

Baaritaanka qaaxada

Qaaxada oo la qaada waxey qeyb ka tahay baaritaanka cudurka TBda

SOMALI

Macluumaadka dhabta ah oo ku saabsan cudurka qaaxada

TB waa cudur oo uu sababo bakteeriyaha la yirahda (M. Tuberculosis). Bakteeriyahan waxaa uu ku faafaa hawada isagoo dhibic yar ah marka uu qunfaca, hintishooda, hadlo ama uu qoslo qofka qaba TB saameysay sambabka.

Dadka neeftaan qaata waxaay ay sidoo kale qaadan karaan bakteeriyaha cudurkana wuu ku dhici karaa. Ku dhawaad 10% dadka qaata neeftaas waxaa ay hal mar noolashooda oo dhan heli karaan cudurka TBda oo uu bakteeriyahiisa ku nool yahay gudahooda. Si loo cadeeyo in ay jirto TB, waa in aad dhowr jeer isbaarta. Baaritaanka qaaxada waa mid ka mid ah baaritaanadaas.

Sidee baaritaanka loo sameeyaa? Marka baaritaanka la sameynaaya waa in aad neef ahaan gudaha u qaadataa biya cusba leh iyadoo la isticmaalaya aalad ku xiran hawada oksigiinka. Qaaqa halkaas kasoo baxaya waxaa uu sahlayaa qunfac oo soo saraya qaaxa ka timid sambabka.

Isdiyaarinta Haa cunin ama haa cabin 4 saacadood ka hor wakhtiga baaritaanka.

Sidee loo qaada cudurka TBda?



Waxaana uu ku faafinaya qofka neef ahaan u qaato dhibicyada bakteeriyaha TBda oo uu soo gudbiyay qofka cudurka qaba.



TBda waxaa laga qaadaa qof qabo bakteeriyaha tubercle basillus. Bakteeriyaha wuu faafayaa marka uu qofkaas qunfaca, qoslo, hintishooda, heeso ama uu hadlo.



Aaladda furuuryahada ku qaba adigoo si caadi ah afka uga neefsanaaya. Mararka qaado neef dheer. Wixii candhuuf ah oo afkaaga ku jira xiligaas wad liqi kartaa laakiin wixii qaaxa ama diif ah waa in la tufaa.



Marka aad qunfici rabtid afka ka bixi afkaada aalada. Si xoog lehna u qunfac dhowr jeer.



Ku rid dhamaan qaaxada la socota qunfacaada galaaska baaritaanka lagu sameeya. Si galaaska looga ilaaliyo qashin, waxaa la qabanayaa meesha hoose.

Waa in aad sidaa dhowr jeer ku celcelisaa. Samey sida uu ku yirahda sarkaalka caafimaad ee kula joogo. Marka aad dhameysid qaaxada galaaska (waalka) afka ka xir. Ugu dambeyn gacmahaada dhaq.

Ka dib maxaa dhacaya?

Jawaabta baaritaanka waxey diyaar noqoneysaa muda u dhaxeysa 6 ilaa 8 usbuuc. Waxaa lagu siinaya balan kale. Iyadoo ay ku xirantahay jawaabta baaritaanka, dhakhtarka ayaa kuu sheegi doono waxa dhici doono markaas ka dib.